Erayga iyo Maanta Somtwt 0226
Siismada Ilaah

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **Siismada Ilaah.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **Siismada** ee aan **h**alkan idiinku lafaguri doonno. Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

SONG: CD 1:8

Weedha ah **"Rabbiga ayaa ina siin doona"**, ayaa waxaa niyadda ku dhisan jiray masiixiyiinta qarniyo badan. Markii lagu jiro wakhti adag, silic iyo xiisado daran, oo dadku u baahn yihiin kabasho iyo samatabbixin, oo weliba aanay jirin wax jawaab ah oo la helayo, ayaa rumaystayaashu midba kan kale ku yiraahdaa, **"Rabbiga ayaa wax ina siin doona."**

Ma jirin qof kaga baahi badnaa inuu Rabbigu jawaab keeno marka loo barbardhigo dadka kii ugu horreeyey ee hadalkaas laga qoray oo ahaa Ibraahim sida ku qoran kitaabka Bilowgii cutubka 22aad. Kaddib markii Rabbigu amar bixiyey, oo ahaa dalab tijaabada rumaysadka ahaa ee la siiyey Ibraahim, ayaa Ilaah ku yiri, **"Wiilkaaga wado, kan aad jeceshahay oo waxad tagtaa buurta Mooriyaah la**

yiraahdo, oo halkaas wiilkaaga ugu bixi qurbaanka gubniinka mid ka mid ah buuraha aan ku tusi doono.” Miyaad fahmi kartaa dhibka iyo xiisadda uu keeni karo amarkaas Ilaah ka yimid, khaasatan marka ilmahaasu uu ku yimid ama lagu dhalay si mucjiso ah? Kani waa wiilkii ballanka ee Ibraahim sugayey 24 sannadood markaasoo Ibraahim soo gaaray 99 sannadood oo uu Ibraahim la galay markii uu 75 jirka ahaa kaasoo markaa imminka loo oofiyey. Haatan wiilkii wuu koraayey, oo ballankiina waa la oofiyey, markaasaa haddana Ilaah u muuqday Ibraahim.

Waxaa lagu yiri wiilkan gee buur Mooriyaah taasoo aan ku tusi doono, oo halkaas sida qorbaanka allabbariga la gubo ugu bixi isaga. Haddii, haddaba abid la arkay imtixaan rumaysad qof la imtixaamo, waa midkan Ilaah imtixaamayo Ibraahim. Jawaabtii kowaad ee Ibraahim Ilaah siiyey waxay ahayd, **“Maxaad I tiri!”** Wax la garan karo maahayn in Ilaah Ibraahim sidan ku yiraahdo. Innagu ma fahmi karno arrinka, dunidii hore iyo casri-jaahiligii ayaa quruumaha karaahiyada ah ilaah-ku-sheegyadooda loo dalbi jiray qurbaanno caynkan oo kale ah.

Haddaba ilaah-ku-sheegyadu wax jira ma ahayn, oo dadkana wax ma weyddiisan jirin, laakiin dadka ayey la ahayd inay sidaas wax u bixiyaan si ay uga farxiyaan ilaah-ku-sheegyadooda. Markaasina dadka reer Kancaan ayaa ilmahooda qurbaan ahaan u bixin jiray si ay isugu taxluujiyaan inay asnaamtooda ka helaan qanacsadaan. Markaasina maaddaama dhaqamada quruumihii hore ay sidan u bixin jireen ilmahooda, ayaa Ibraahim ay la noqotay sida

abbaarta ah, in dalabkanina yahay isla kuwii ay ilaah-yada kale codsan jireen. Markaasina wuxuu bixinayaa wiilkiisa. Balse xaqiiqa ahaan sidaas ma ahaan doonto, danta Ilaahna sidaas maahayn. Ilaah wuxuu doonayey inuu keeno xal, wuxuuna siin doonaa Ibraahim orgi kaynta madaxa kula jira, laakiinse waxay ahayd in marka hore Ibraahim la imtixaamo. Tanina waa namuunada kala duwan ee tijaabada ama imtixaanka. Waana sida uu u dhoco imtixaanka nolosheena oo waxaan doonayaa inaan idiin dhex qaadsiiyo tallaabada rumaysadka qaddar si aad kaga mahad celisaan markaad garataan in rumaysadka oo dhan la tijaabiyo.

Ilaah wuxuu doonayaa inuu eego oo fiiriyo haddii kalsoonida aad ku qabto Ilaah iyo jacaylka aad jeceshahay ay daacad kaa yihiin, oo ay gudaha jireen balse ayan dusha joogin. Waxaa jira dad badan oo yiraahda, **"war anigu Ilaah waan jecelahay, oo waxaan doonayaa in la ii garto inaan ahay qof Ilaah iimaan ku qaba"**, laakiinse wixii ilaah weyddiistay ayaa ku noqday wax aan la qaadan karin.

Tijaabada sidan bay kuugu timaaddaa. Waxay ka bilaabataa dalab weyn oo Ilaah, iyo amar ay tahay inaad wax aan macquul ahayn samayso, oo ka baxsan awooddeenna. Mararka qaar garan mayno sababta Ilaah inoo weyddiisanayo waxyaalahaas qayra-caadiga ah. Sida xaqiiqda ah, kaddib markii uu muddo 25 sannadood dhowrayey, oo uu da' weyn ku helay wiilka, ayaa Ilaah haddana ku leeyahay Ibraahim wiilkaaga qurbaan la gubo sidiisii u bixi.

Waxaa qorniinku inoo sheegayaa haddana in Ibraahim ay la noqotay oo uu is yiri, ilmahan laygu siiyey mucjisada, Ilaah waa awoodaa inuu haddana dhimashada ka soo kiciyo. Wuxuu is-yiri, "Ilaaha Qaadirka ah, wuxuu wiilka ka soo bixin Karaa qabriga." Maraasina Ibraahim wuxuu doonaayey inuu Ilaah addeeco. Laakiin, markii aad tijaabo Ilaah ka hesho, tan xigta waa inaad ficil geliso wixii lagu weyddiistay. Maahan inaad iska fadhiso, oo aad is-moogaysiiso. Markii Ilaah imtixaan ku siiyo, waa inaad la timaaddo ficil rumaysad leh, oo qayb ka ah dhaqangelinta wixii Ilaah ku weyddiistay.

Waxaad kala ogaan kartaa kuwa Ilaah dhab ahaan ugu kalsoon iyo kuwa aan Ilaah ku kalsoonayn, waayo kuwa dhab ahaan Ilaah ku kalsoon wax qabad ayey leeyihiin. Waana tii rasuul Yacquub inoo sheegay markii uu lahaa, **"Rumaysadka aan shuqulka lahayn waa meyd,"** oo Ibraahim ayaa tusaale loo soo qaatay iyadoo la leeyahay, waa shakhsi ka farxiyey Ilaah kaddib markii uu ficil ka dhigay oo dhaqan geliyey rumaysadkiisii.

Dabadeetana waxaa imanaya oo jiraya in qofku Ilaah **xoog ku yeesho**. Qaybtan imtixaanka ah waa markii adigoo aan fahmin, oo aan garanayn sida uu u shaqaynayo amarka iyo sababta Ilaah tijaabada u soo diray, oo aad la rafanayso,haddana aad Ilaah amaanayso. Waxaad weli adkaynaysaa kalsoonadaadii Ilaah, oo isaga ayaad amaanaysaa oo aad ku leedahay **"Rabbigu wuu wanaagsan yahay inkastoo anigu aan xiisado daran ku jiro."**

Dabadeetana waxaa imanaya barako. Markii aad ficil la timaaddo, oo Ilaahna keeno xalka, wuxuu kuu

muujinayaa barakadiisa oo ku imanaysa qaab ka duwan sidii aad moodaysay. Markii aad eegto xaalka Ibraahim, markii uu la hadlayey wiilkiisii Isxaaq, wuxuu ku yiri, **"Wiilkaygiiyow, Ilaah baa keeni doona qurbaanka."** Xaqiiqdii, taasina waxay noqotay wixi Ilaah sameeyey. Ibraahim rumaysadkiisu wuu qota dheeraa, wuxuuna Ibraahim helay barako, iyo xaqiijinta ah in Ilaah uu badin doono qoyskiisa, oo uu welibana qoyskiisa ka dhigi doono mid quruumaha dunidu ay ku bara-koobi doonaan. Bal aan qadar yara hakanno oo idiin xaqiijinno in barakada ugu dambaysa ay soo marayso qofnimada Ciise Masiix, oo isagu ah Wiilka keliya, ee qaaliga ah. Markaasina waad arkaysaa, in wixii halkan ka dhacay ay ahaayeen, in Ilaah Ibraahim ugu yeeray inuu qurbaan u bixiyo wiilkiisa, iyadoo uu ku tijaabinayey bal si uu ku arko inuu yeelayo iyo in kale, balse qurbaanka uu Ilaah kol dambe keeni doono.

Wuxuu ina siin doonaa wiilkiisa keliya si uu ugu silco, oo ugu dhinto dadka dunida. Ciise waxaa loo bixinayaa sida kafaaragudka dembiga, si qiimihii dembigeenna loo gudo. Taasina waa wax aad iyo aad u wanaagsan.

Markaasina waad arki kartaa sababta Ilaah aad ugu farxay markii Ibraahim doortay inuu Ilaah addeeco, xitaa markii uu soo gaaray heerkan ah inuu wiilkiisa qaaliga ah bixiyo, waayo Ilaahan sidaasuu aniga iyo adigaba inoo sameeyey. Waa wax qiima badan oo aan la heli karin oo niyadsami leh in aan Ilaah ku kalsoonaanno iyadoo weliba ay jirto cabsi, shaki iyo walaac oo intaa kaddibna aan helno barako.

Ugu dambaystiina waxaa jiraya calmasho am taaj la siinayo Ibraahim. Tan ugu yaabka badan rumaysadkii Ibraahim waxay ahayd, kaddib tijaabadan, markii uu ka gudbay imtixaankii, oo malaa'igtu ay ka joojisay inuu wiilkiisa bixiyo ayey u sheegtay in Ilaah ku farxay, Ibraahimna xaqnimo ayaa loogu tirayey rumaysadkiisii. Taasina waxay ka dhigan tahay Sharfid ama caleema-saar loo caleema saaray xaqnimo. Kitaabka Bilowgii 22:13 ayaa waxaa ku qoran sidatan: **"Markaasaa Ibraahim indhihiisii kor u taagay, oo wax fiiriyey, oo wuxuu gadaashiisa ku arkay orgi geesaha kayn kula jira. Markaasaa Ibraahim tegey oo orgigii soo kaxeeyey, oo wuxuu u bixiyey allabari guban meeshii wiilkiisa. Ibraahimna meeshaas wuxuu u bixiyey Yehowah Yireh; xataa ilaa maanta waxaa la yidhaahdaa, Buurta Rabbiga ayaa lagu arki doonaa."**

Haddaba, magaca buurta wuxuu ka dhigan yahay, **"Ilaah baa keeni doona."** Magacaasina halkaas ayuu ka soo jeedaa. Markaasina haddii ay xiisado ina hor yaallaan, iyo wakhti adag, amase haddii aan dareenno in Ilaah ina tijaabinayo, waxaan xusuusan karnaa dhacdadii Ibraahim, oo waxaan arkaynaa in Ilaah keeni doono ama haqab-tiri doono baahida aan qabno.

Isla sidii Ilaah u keenay orgi oo uu u badbaadiyey wiilkii Ibraahim, isla sidaas oo kale Ilaah wuu ina haqabtiri doonaa. Wuxuu ina keeni doonaa meel aynu rumaysad ahaan ku dhegno ama aan ku dhex soconno, si aynu Ilaah u adeecno. Bawlos ayaa inagu xusuusinaya Warqaddiisii Korintos inaanay jirin jirrabaad ka weyn itaalkeenna, taasoo aan loo babac dhigi karin. Waxaan hubaa in Ibraahim

loo tijaabiyey si uusan Ilaah u addeecin. Waxaanse hubaa inaanu doonaynin inuu sameeyo wixii Ilaah weyddiistay, laakiin haddana waxay ahayd inuu Ilaah ku kalsoonaado, maaddaama Ilaah garanayo waxa la weyddiistay Ibraahim, iyo in isagu uu keeni doona xalka. Isaga keliya maahan ee weliba Ilaah wuxuu xal u keenayaa aniga iyo adiga markii layna tijaabiyo. Wuxuu ina siiyey wiilkiisa Ciise Masiix, wuxuuna ina weyddiistay inaan rumaysanno isaga, oo ku soconno doonistiisa. Waxaa jiraya jirrabaado badan oo hor taagan inaan rumaysanno Ilaah oo raacno Masiixa.

Waxaana ina sugaya silic iyo rafaad inooga imanaya dad khaas ah. Waxaa kaloo jiraya wakhti adag, iyo marxalado inagu hor gudban, laakiin waa inaan ku soconno rumaysad, oo aan kalsooni ka qabno Ilaah inuu daboolayo baahideenna iyo inuu xal keenayo. Taasi haddaba waa qiso wacan; oo xiiso leh. Ha kuu noqoto mid aad qalbi qaboojin ka hesho, oo inkastoo aadan had iyo goorba garanin doonista Ilaah ee noloshaada, oo ay kaa qarsoon tahay, iyo inkastoo aadan arkaynin orgigii samatabixinta ee dhirta ku hoos jiray ilaa wakhtiga habboon la soo gaaro, ayaa la doonayaa inaad ogaato in Ilaah tijaabinayaa rumaysadkaaga. Wuu ku dhowrayaa, ama ku sugayaa. Adigana waa inaad la timaaddo rumaysad iyo kalsooni. Imtixaanku ma fududa, laakiin waa loo baahan yahay si loo hubiyo in aan xaqiiqdii Ilaah u go’nay iyo in kale. Wakhtiga adag Ilaah baa kula jiraya, kuna eegaya oo welibana ku siinaya deeqdiisa, markaad buurta korkeeda soo gaarto.

SONG: CD 2:4

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hor-marinaysaan Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.